National Institute for Public Health
and the Environment
Ministry of Health, Welfare and Sport

Baaritaanka cudurka *qaaxada ee laga qaado* dadka soo galootiga ah

Xog ku saabsan baaritaanka cudurka qaaxada ee laga qaado dadka soo galootiga ah



Cudurka qaaxada (TB) waa cudur aad u daran oo aduunka oo dhan laga helo. Sidoo kale dalka aad ka imaatay waa laga helaa. Taasina waa sababta lagaaga baaraayo cudurka qaaxada markaad timaado dalka Nederlaan. Baaritaanka koowaad waa qasab sida ku xusan Xeerka Ajaaniibta (sharciga soo galootiga). Baaritaanka mararka qaar waa in lagu celiyaa. Ayadoo lagu saleynaayo heerka cudurka ee dalka aad ka imaatay. Waa muhiim inaad sameyso baaritaanada. Waxay muhiim u tahay caafimaadkaaga iyo caafimaadka dadka kuu dhaw.

Waa maxay cudurka qaaxada?

Cudurka qaaxada (TB) waa cudur aad u daran, oo ay sababtay bakteeriyadu. Cudurka wuxuu caadiyan saameeyaa sambabada (qaaxada sambabada). Qofka qaba qaaxada sambaba wuxuu cudurka qaadsiin karaa dadka kale asagoo ugu gudbinaaya qufac ahaan. Astaamaha muujin kara cudurka qaaxada waxaa kamid ah qufac, culeyska jirka oo hoos u dhaca, xumad aad u sareysa (qandho) iyo dhidid habbeynkii yimaada. Dadka qaar kamid ah waxay muujiyaan astaamo khafiif ah ama maba muujiyaan astaamo gabi ahaanba. Sidaas oowgeed waxaa laga yabaa inaad qabto cudurka adoon astaamo lahayn.

Baaritaanka

Dhowr baaritaan ayaa loo adeegsadaa cudurka qaaxada. Nooca baaritaanka aad sameyneyso waxay ku xiran tahay caafimaadkaaga, da'daada iyo dalka aad ka imaatay. Si loo oggaado nooca baaritaanka ugu habboon adiga, laanta Adeega Caafimaadka Dadwaynaha (GGD) waxay marka koowaad ku waydiin doonaa su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga.

Raajitada xabadka

Raajitada xabadka (ee sambabada) waxay si dhaqso ah u aqoonsan kartaa waxyeelo kasta oo muujin kara inaad qabto cudurka qaaxada. Natiijada raajitada waa inay diyaar noqotaa dhowr maalmood gudahood. Raajitada xabadka wax dhib ah ma keento. Sidoo kale waxaa loogu talagalay carruurta iyo dumarka uurka leh. Xog dheeraad ah oo ku saabsan baaritaankaan waxaad ka heli kartaa xaashida **Baaritaanka Qaaxada (TB) ee adeegsado Raajitada xabadka**.

Baaritaanka maqaarka ee lagu ogaado qaaxada (Baaritaanka Mantoux)

Baaritaanka waxaa kujira dheecaan yar oo lagu duraayo maqaarka gaar ahaan qaybta kore gacanta bidix. Kalkaaliyaha daryeelka caafimaadka wuxuu qiimeyn

ku sameyn doonaa xasaasiyada maqaarka kadib labo illaa saddex maalmood. Falcelinta xasaasiyada, sida boogo yaryar, waxay muujin karaan inaad qabto bakteeriyada qaaxada (TB). Xog dheeraad ah oo ku saabsan baaritaankaan waxaad ka heli kartaa xaashida xogta ku saabsan **Baaritaanka Maqaarka iyo Baaritaanka Dhiiga ee lagu ogaado Cudurka Qaaxada (TB)**.

Baaritaanka dhiiga (IGRA)

Baaritaankaan waxaa kujira muunad dhiig ah oo lagaa qaadaayo. Dhiiga waxaa loo diraa shaybaarka si baaritaan loogu sameeyo. Baaritaankaan wuxuu muujin karaa inaad qabto bakteeriyada qaaxada (TB) iyo inkale. Natiijadu waxay diyaar noqon doontaa kadib labo illaa saddex asbuuc.
Xog dheeraad ah oo ku saabsan baaritaankaan waxaad ka heli kartaa xaashida xogta ku saabsan **Baaritaanka Maqaarka iyo Baaritaanka Dhiiga ee lagu ogaado Cudurka Qaaxada (TB)**.

Maxaa dhacaaya kadib baaritaanka?

- Waaxda qaaxada waxay u dirtaa Immigration and Naturalisation Service (IND, Adeega Jinsiyadaha iyo Socdaalka) caddeyn xaqiijinaysa in lagaa baaray cudurka qaaxada. Waxaa laga yabaa in GGD sidoo kale ay adiga ku siiso caddeyntaan. Si markaas kadib aad ugu dirto IND.
- Natiijada baaritaanka waxaa qiimeeya dakhtarka cudurka qaaxada ee GGD.
- Natiijada baaritaanka marnaba lalama wadaago IND.
- Haddii natiijada baaritaanka tahay mid wanaagsan oo aan (sheegeyn cudurka) laguuma soo sheegi doono.
- Hase yeeshee, waa laguu soo sheegi doonaa haddii baaritaanku muujiyo cilado jira. Badanaa waxaa loo baahan doonaa baaritaano dheeraad ah si loo ogaado inaad qabto cudurka qaaxada iyo inkale. Sidaas darteed haddii GGD kugu casuunto inaad qabsato balan kale, waa muhiim inaad tagto.
- Haddii aad qabto cudurka qaaxada, sida ugu dhaqsiyaha badan ayaa laguu daaweyn doonaa. Arrintaan waxay muhiim u tahay, adiga iyo dadka kuu dhaw.
- Raajada xabadka waa “sawir” laga qaadaayo xaalada markaas jirta. Haddii muddo kadib aad isku aragto astaamo muujin kara inaad qabto qaaxada. sida qufac, culeyska jirka oo yaraada, qandho ama dhidid habbeynkii yimaada, markaas mar walba la xariir dakhtarka qoyskaaga. Xataa haddii mar dhow lagaa qaaday baaritaanka. Waxaad sidoo kale la xariiri kartaa waaxda kahortaga cudurka qaaxada ee GGD ee deegaankaaga.

Cudurka qaaxada iyo daaweynta qaaxada kuma jiraan sababaha qofka loogu diido helida deganaanshaha. Mabda’ahaan, waxaad awoodi doontaa inaad daawada ku qaadato Nederlaan.

This information is available in English at:
Xogtaan oo Soomaali ah waxaa laga heli karaa:
ብቋንቋ ትግርኛ ዝተተርጕመ መልክዕ ናይ'ዚ ሓበሬታ፡ ኣብ'ዚ ዝስዕብ ገጽ ክርከብ ይከኣል፡-
هذه المعلومات متاحة باللغة العربية في هذا الموضع:
این معلومات به زبان دری در اینجا قابل دسترس است:

www.rivm.nl/en/tuberculosis/information-materials

Published by:

National Institute for Public Health and the Environment, RIVM
PO Box 1 | 3720 BA Bilthoven
The Netherlands
www.rivm.nl/en

March 2022

Committed to *health and sustainability*

013627